

KHIDMADA RAACITAANKA METRO BUS

Marka aad fuusho baska, waa inaad bixiso khidmada raacitaanka. Diyaar u noqo in aad khidmadaada raacitaanka taabsiiso iskaangarayso, mariso, ama aad ku riddo.

SIDA LOO BIXIYO

KHIDMADAADA RAACITAANKA

Kaash | Kaarka Smart Ride | Tigidhka Smart Ride | Aabka Metro Bus ee Smart Ride



Lacag kaash ah: Lacag kaash ah ugu bixi khidmada raacitaanka si toos ah sanduuqa khidmada. Sanduuqa khidmada raacitaanku wuxuu aqbalaa qadaadiic (marka laga reebo qadaadiicda nus-doolarka ah) iyo lacagta kaashka ah ilaa \$20. Fadlan isticmaal xaddiga saxda ah. Sanduuqa khidmada raacitaanku ma awoodo in uu kuu soo celiyo baaqi. Wareejisashada lama heli karo marka la isticmaalayo lacag kaash ah.

Kaadhka Metro Bus ee Smart Ride:

Ku hel fursadaha ugu raqiisan kaarka Smart Ride, oo ku shaqeeya dhammaan adeegyada Metro Bus. Bixinaya Qiimaha ku Kaydsan ee lagu bixiyo khidmadaada raacitaanka ama Kaarka Raacitaanka Marar badan oo aan xaddidnayn inta uu shaqaynayo. Ku iibso Kaararka Smart Ride \$3 oo kaga shubo lacag ama bas raaca Xarunta Gaadiidka (Transit Center), goobaha tigidhada ama internetka ridemetrobus.com/fares.



Aabka Metro Bus ee Smart Ride:

Ku soo dejiyo aabka bilaashka ah ee Metro Bus Smart Ride taleefankaaga gacanta si aad ugu iibsato Kaarka Raacitaanka Marar badan ah ee loogu talagalay dhammaan adeegyada Metro Bus. Daaro QR koodhka marka basku soo dhawaado si aad u bixiso khidmada raacitaanka.



Tigidhka Kaarka Bas Raacitaanka

Metro Bus Smart Ride: Kaarka raacitaanka 1-maalin ayaa laga heli karaa Tigidhka Smart Ride. Wuxuu ku filanyahay raacitaan aan xadidnayn hal maalin Jidadka Khadka Joogtada ah. Tikidhka Smart Ride ka soo iibso Xarunta Gaadiidka.



Dhammaan iibku waa kama dambays.

Lacagta lagu celinmaayo ama lagu beddeli maayo. Kaarka Smart Ride iyo App-ka Smart Ride lama wada xidhiidhin. Alaabooyinka la soo iibsaday maaha kuwo la kala wareejin karo dhexdooda.

METRO BUS
the people picker-uppers.

320.251.1499 ridemetrobus.com/fares

KHIDMADA RAACITAANKA JIDADKA KHADKA JOOGTADA AH

\$1.25 - LACAG KAASH HALMAR LAGU RAACO
(WAX ISBEDDEL AH MA LEH) AMA KHIDMADA QIIMAHA
KU KAYDSAN*

\$10.50 - KAARKA 10 JEER BAS LAGU RAACO
(10-RIDE PASS)

Kaarka Bas Raacitaanka 10-maalmood ayaa laga heli karaa Kaarka Smart Ride Wuxuu ku filanyahay 10 bas raacitaan oo ku socda nidaamka khadka Metro Bus ee joogtada ah.

\$4.25 - KAARKA 1-MAALIN BAS LAGU RAACO

Kaarka 1-Maalin ah ayaa laga heli karaa App-ka Smart Ride App iyo Tigidhka Smart Ride oo loogu talagalay raacitaan aan xadidneyn hal maalin Jidadka Khadka Joogtada ah.

\$17 - KAARKA 7-CISHO BAS LAGU RAACO

Kaarka Bas Raacitaanka 7-maalmood ayaa laga heli karaa Smart Ride Appka iyo Kaarka Smart Ride Wuxuu ku filanyahay raacitaano aan xadidnayn 7 maalmood oo isku xiga oo lagu raaco Jidadka Khadka Joogtada, laga bilaabo adeegsiga koowaad.

\$47 - KAARKA 31-CISHO BAS LAGU RAACO (31-DAY PASS)

Kaarka Bas Raacitaanka 31-maalmood ayaa laga heli karaa Aabka Smart Ride iyo Kaarka Smart Ride Wuxuu ku filanyahay raacitaano aan xadidnayn 31 maalmood oo isku xiga oo lagu raaco Jidadka Khadka Joogtada, laga bilaabo adeegsiga koowaad.

KHIDMADA RAACITAANKA CONNEX

\$2.50 - LACAG KAASH HALMAR LAGU RAACO
(WAX ISBEDDEL AH MA LEH) AMA KHIDMADA QIIMAHA
KU KAYDSAN*

\$75 - KAARKA 31-CISHO BAS LAGU RAACO

Kaarka Bas Raacitaanka 31-maalmood ayaa laga heli karaa Aabka Smart Ride iyo Kaarka Smart Ride Wuxuu ku filanyahay raacitaano aan xadidnayn 31 maalmood oo isku xiga oo lagu raaco ConneX iyo Jidadka Khadka Joogtada, laga bilaabo adeegsiga koowaad.

KHIDMADA LAGU RAACO DIAL-A-RIDE

\$2.50 - LACAG KAASH HALMAR LAGU RAACO
(WAX ISBEDDEL AH MA LEH) AMA KHIDMADA QIIMAHA
KU KAYDSAN*

\$75 - KAARKA 31-CISHO BAS LAGU RAACO

Kaarka Bas Raacitaanka 31-maalmood ayaa laga heli karaa Aabka Smart Ride iyo Kaarka Smart Ride Wuxuu ku filanyahay raacitaano aan xadidnayn 31 maalmood oo isku xiga oo lagu raaco ConneX, Dial-a-Ride iyo Khadka Joogtada, laga bilaabo adeegsiga koowaad.

KHIDMADA RAACITAANKA EE LA DHIMAY

Khadka Joogtada ah keliya. Rakaabku waa inay muujiyaan caddaynta u qalmitaanka. Waxaa la heli karaa xilliyada adeegsiga badan (Isniin-Jimco: 8:40 AM -3:40 PM iyo 5:40 AM-10:43 PM. Sabtida-Axada: maalinta oo dhan) oo loogu talagalay shakhsiyaadka naafada ah iyo waayeelka da'doodu tahay 65 iyo wixii ka weyn. Waa in uu muujiyaa caddaynta u-qalmitaanka.

\$.60 - KAASH LA DHIMAY (WAX ISBEDDEL AH MA LEH)
AMA KHIDMADA QIIMAHA KU KAYDSAN*

BILAASH - CARRUURTA 5 IYO KASII YAR

Illa saddex carruur ah oo shan jir ah iyo kuwa ka sii yar ayaa ku raaca lacag la'aan iyagoo la socda qof khidmad ku raacaya mid kasta oo Metro Bus ka mid ah.

*Qiiimaha ku Kaydsan waa lacag lagu shubay Kaarka Smart Ride si loogu bixiyo khidmadaha raacitaanka adeeg kasta oo Metro Bus ah. 12/21